**TILMAAMAHA MUHIIMKA AH EE ILAALINTA DACWOODAHA QAXOOTIGA AH.**

Warqaddan waxay ku siisaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dacwadaada ilaalinta qaxootiga ah, ay ka mid tahay macluumaadka aad ogsoonaanayso sida ta soo socota:

1. Waxaad leedahay xaqa uu kugu matelo la taliye aad kharashka isku qabto, laakiin la taliyaha la doortay waa in la heli karo taariikhda loo qorsheeyay dhegaysiga.
2. Waxaad ka masuultahay helida iyo siinta Qaybta Ilaalinta Qaxootiga (RPD) ee Guddida Canada ee Socdaalka iyo Qaxootiga (IRB) warqadda kasta oo taageera dacwadaada ilaalinta qaxootiga. Hadda waa inaad samaysaa qaban qaabooyin si aad u hesho warqaddahan taageeraya iyaddoon la daahin.

**SAMAYNTA DACWADA**

Waxaad u samayn kartaa ilaalinta qaxootiga sheegasho addoo la hadlaya sarkaalka ka socda Wakaalada Adeegyada Xadka Canada (CBSA) ama Socdaalka, Qaxootiga iyo Sinjiyada Canada (IRCC) xaga meesha laga soo galo (garoonka diyaarada, dekadaha badda ama Xadka Canada-Maraykanka). Sarkaalku go'aan ayuu gaadhi doonaa haddii dacwadaadu ay u qalanto in loo gudbiyo RPD si loo dhegaysto. Waxaad heli doonaa foomka *Xaqiijinta Gudbinta* ee sheegaya in dacwadaada loo gudbiyay RPD. Taariikhda dambe, waxaad heli doontaa *Ogaysiiska in La yimaado* oo kugu wargelinaya adiga taariikhda, meesha iyo wakhtiga dhegaysigaaga.

**FOOMKA AASAASKA DACWADA**

Dacwooda kasta waa inuu gudbiyaa Foomka Aasaaska Dacwada (Foomka BOC) ee ku socda RPD. Haddii aad dacwadaada ku samayso xafiiska gudaha dalka ah, waa inaad u gudbisaa Foomka BOC sarkaalka marka aad samayso dacwadaada oo sarkaalku waxa uu u diri doonaa RPD. Haddii aad dacwadaada ku samayso meesha laga soo galo, sarkaalka waxa uu ku siin doonaa adiga Foomka BOC si loo buuxiyo. **Waa inaad siiso RPD Foomkaaga BOC ee la buuxiyay wakhti aan ka dambayn 15 maalmood laga bilaabo taariikhda gudbinta RPD. Waa inaad u gudbisaa cinwaanka RPD xafiiska lagu bixiyay Xaqiijinta foomkaaga Gudbinta, xataa haddii aad u guurto aaga ka duwan oo Canada ah.** Haddii aanad gudbin Foomkaaga BOC muddadan loo qabtay, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad soo xaadirto dhegaysiga gaarka ah si aad u sharaxdo sababta aanad u soo gudbin Foomkaaga BOC wakhti buure ah. Haddii aad soo xaadiri waydo dhegaysigan gaarka ah ama aanad bixin sharax macquul ah, dacwadaada waxaa lagu dhawaaqi doonaa mid la iska daayay. Macluumaadka ku saabsan taariikhda, wakhtiga iyo goobta dhegaysigaaga gaarka ah haddii aanad gudbin Foomka BOC guddaha wakhtiga loo qabtay waxaa laga heli karaa *Xaqiijinta Gudbinta* haddii dacwadaada laga sameeyay meesha laga soo galay.

**QORSHAYNTA DHEGAYSIGA**

Taariikh dambe, waxaad heli doontaa *Ogaysiiska In la yimaado* ee kugu wargelinaya adiga taariikhda, wakhtiga iyo goobta ee dhagaysigaaga. Haddii aad iman waydo dhegaysigaaga, waxaa lagaaga baahan yahay in la soo xaadiro dhegaysi gaar ah si loo sharaxo sababta aanad u xaadirin dhegaysigaaga. Macluumaadka ku saabsan taariikhda, wakhtiga iyo goobta iska daynta waxaa sidoo kale lagu bixin doonaa *Ogaysiiska in La yimaado.* Haddii aad iman waydo dhegaysiga gaarka ah ama aanad bixin sharax macquul ah ee seegida dhegaysigaaga, dacwadaada waxaa loogu dhaqaaqi doonaa mid la iska daayay. Haddii RPD ay ku dhawaaqdo dacwadaada mid la iska daayay, laguuma oggolaan doono inaad sii wadato dacwadaada ama aad samayso dacwad kale mustaqbalka.

**DHEGAYSIGAAGA**

Dhegaysiga caadi ahaan waxaa loo qorsheeyaa maalin badhkeed, miduun subaxda ama galabta. Dhegaysigu waa gaar waana qarsoodi. Dhegaysigaaga waxaa go'aan ka gaadhi doonta xubin RPD ah. Xubinta RPD waa

…/2

qofka go'aanka gaadha ee qaatay tababar gaar ah oo ku saabsan ilaalinta qaxootiga. Dhegaysiga waxaa loo qabtaa mid uun qof ahaan ama kullanka fiidyaha haddii xubintu uu joogo goob kale. Xaga dhegaysiga, waxaad caddayn doonaataa oo ka jawaabi doontaa su'aalaha labbadaba xubinta iyo la taliyaha. Haddii IRCC ama CBSA ay ka qayb gelayaan dhegaysigaaga, la taliyaha arrimaha sharcigu sidoo kale waxa uu waydiin doonaa su'aalo. Haddii aad markhaatiyo haysato, markhaatigaagu sidoo kale waxa uu bixin doonaa caddaymo. Ka dib marka adiga iyo markhaatiyo kasta ay caddaynta bixiyaan, xubintu waxay adiga ku waydiin doontaa inaad sharaxdo sababta aad ugu malaynayso inaad tahay **Qaxooti cabsi wadankoodii kala soo daristay** ama **qof u baahan ilaalin**:

- Waxaa lagaaga fekeraa **Qaxooti cabsi wadankoodii kala soo daristay** haddii aad leedahay cabsi macquul ah oo cadaadis ah gudaha wadankaaga aad u dhalatay iyaddoo ku salaysan isirka, diinta, dhalashada, xubnimada koox bulsho ama fikrad siyaasadeed.
- Waxaa lagaaga fekeraa **qof u baahan ilaalin** haddii shakhsi ahaan laguu gaysan lahaa khatar jidh dil ah, inaad halis geliso naftaada ama inaad halis u gasho in laguula dhaqmo axmaqnimo aan caadi ahayn ama ciqaab haddii lagugu celiyo wadanka aad u dhalatay.

## GO'AANKA

Xubintu waxay go'aan ku gaadhi kartaa dacwadaada oo waxay kuu sheegi kartaa dahmmaadka dhegaysiga ama waxay sugi karaan oo waxay kuugu soo diri go'aanka boostadda. Waxaad heli doontaa Go'aanka Ogaysiiska, kaas oo sheega go'aanka iyo sababaha ah sababta dacwadaadu ay ahayd ama loo diiday. Haddii dacwadaada la diido, sidoo kale waxay sheegi doontaa haddii aad rafcaan ka qaadan karto Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (RAD) ama codsi u samee Maxkamadda Federaalka.

## BEDDELKA GOOBTA DHEGAYSIGA

Foomka *Xaqiijinta Gudbinta* waxa uu bixiyaa cinwaanka halka aad u soo gudbinayso Foomka BOC, haddii laga dacwoonayo meesha wadanka laga soo galo, iyo halka uu dhegaysigaagu ka dhici lahaa. Haddii aad qorshaynaso inaad guurto oo aad doonayso inaad u beddesho goobta dhegaysiga magaalo kale, waa inaad qoraal ahaan ku codsataa. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa foom ujeedadan ah websaydka IRB (http://www.cisr-irb.gc.ca/). RPD waa inay ku heshaa codsiga ugu yaraan 20 maalmood ka hor taariikhda dacwadaada. Xubin RPD ayaa go'aan ka gaadhi doona haddii la bixinayo beddelka goobta—toos maaha. Ilaa aad ka hesho go'aanka, waa inaad sii wadaa inaad la xidhiidho oo u dirto waqaddaha xafiiska ku qoran *Xaqiijinta Gudbinta.* Haddii la qorsheeyay taariikhda dhegaysigaaga oo aanad jawaab helin ka hor taariikhdan, waa inaad tagtaa goobta *Ogaysiiskaaga in La yimaado* oo aad diyaar u ahaataa dhegaysigaaga.

## BEDDELIDA TAARIIKHDA AMA WAKHTIGA DHEGAYSIGA

Haddii aad doonayso inaad beddesho taariikhda ama wakhtiga dhegaysigaaga waa inaad qoraal ahaan ku codsataa. RPD waa inay heshaa codsigaaga ugu yaraan saddex maalmood oo shaqo ka hor taariikhda dhegaysiga, iyaddoo ay tahay asbaabo caafimaad ama gurmad ah mooyaane. RPD waxay keliya aqbali kartaa inay beddesho taariikhda ama wakhtiga hoosta duruufo gaar ah, sida asbaababa caafimaadka ama duruufaha aanad adigu xakamayn karin. Haddii aanad jawaab helin ka hor taariikhda dhegaysigaaga, waa inaad u tagtaa dhegaysigaaga raariikhda iyo wakhtiga *Ogaysiiskaaga in La yimaado* oo loo diyaar ahaadaa in la sii wado.

## SHAHAADOOYINKA CAAFIMAADKA

Haddii aad iman waydo dhegaysigaaga ama codsan waydo in wakhtiga la kordhiyo si loo xareeyo Foomka BOC ama in la beddelo taariikhda, wakhtiga ama goobta dhegaysigaaga iyaddoo ay sababtay asbaabo caafimaad, waa inaad bixisaa shahaadada caafinmaadka. Shahaadada caafimaadka waa inay ahaataa warqadda asalka ah ee taariikhaysan oo si fudud loo akhriyi karo. Sidoo kale waa inuu saxeexaa dhakhtar

…/3

(ama hawl wadeen caafimaad oo kale oo takhasus leh), iyo magaca iyo cinwaanka dhakhtarkan waa in la daabacaa ama lagu shaambadeeyaa shahaadada. Shahaadada caafimaadka waa inay ku jirtaa taariikhda lagaa filayo inaad sii wadato dacwadaada, siiba faahfaahinta xaalada caafimaadka (ogow in magaca xaalada caafimaadka aan loo baahnayn in la caddeeyo). Foomka caafimaadka waxaa laga heli karaa websaydka IRB haddii aad isticmaasho iyadda (http://www.cisr-irb.gc.ca).

**MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA**

Haddii macluumaadkaaga xidhiidhka isbeddelo, waa inaad isla markaaba ku wargelisaa IRB iyo IRCC iyo/ama CBSA isbeddelada qoraal ahaan. Awood uma yeelan doono inaanu kula soo xidhiidhno haddii aanaan hayn macluumaadkaaga saxda ah ee xidhiidhka. Tani waxay sababi kartaa dacwadaada in loogu dhawaaqo mid la iska dayaay. Haddii RPD ay ku dhawaaqdo dacwadaada mid la iska daayay, laguuma oggolaan doono inaad sii wadato dacwadaada ama aad samayso sheegasho kale mustaqbalka.

**LA TALIYE**

**Waxaad leedahay xaqa uu wakiil kaaga noqdo la taliye** (Sida qareen ama la taliyaha socdaalka) kharashkaaga addoo isku qaba, ama waxaad wakiil ka noqon kartaa laftaada. Waxaad u qalmi kartaa inaad caawimo ka hesho wakaalad kaalmada sharciga goboleed.

**Haddii aanad lahayn la taliye** laakiin la taliyaha aad doonayso, waa inaad haystaa la taliye sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

**Haddii la taliyahaagu kharash kugu soo dalaco** (ama aad hesho fiiro kale), la taliyahaaga waa inuu dhammaystiraa Foomka Macluumaadka Xidhiidhka La taliya.

**La taliyaha aan xubinta ka ahayn** urur la ansixiyay wakiil ayuu kaa noqon karaa adiga keliya haddii wakiilnimadu aanay kharash ahayn. Xaaladan, adiga iyo la talinayaagu waa inaad dhammaystirtaan Ogaysiiska Wakiilnimada Aan Kharashka ahayn ama Foomka Kale ee Ka fiirsashada.

**Haddii aad shaqaalaysiiso la taliye ama beddesho la taliye**, waa inaad isla markaaba ku wargelisaa RPD, iyo IRCC iyo/ama CBSA, qoraal ahaan, magaca la taliyahaaga, cinwaanka, lambarka telefoonka, fagas lmabarka iyo cinwaanka iimaylka.

**Haddii aad shaqaalaysiinayso la taliye ka dib taariikhda hadda ka hor la qorsheeyay ee dhagysigaaga**, la taliyahaagu waa in la heli karaa oo uu diyaar yahay si uu u sii wado taariikhda la qorsheeyay. RPD guud ahaan ma beddesho taariikhda ama wakhtiga dhegaysiga sababtoo ah la taliyahu ma soo xaadiri karo.

**Haddii aad beddesho la taliyaha**, waa inaad ku bixisaa magaca la taliyaha cusub dhammaan warqaddaha la xidhiidha dacwadaada. Tan waxaa ka mid ah warqaddaha la siiyay la taliyahaagii hore, miduun laftaada, RPD ama kooxda kale.

**ISTICMAALKA WARQADDAHA IYO MARKHAATIYADA**

**Waa inaad heshaa oo gudbisaa warqaddo kasta oo aad karto** si aad u taageerto dacwadaada, sida warbixinaha booliska, diiwaanada caafimaadka iyo maqaalada wargeesyada. Haddii aad doonayso warqad inaad isticmaasho dhagaysigaaga, waa inaad hubisaa warqadda inay heshay RPD wax aan ka damabyn 10 maalmood ka hor taariikhda dhegaysigaaga. Waa inaad soo bandhigtaa warqadda asalka ah exaga bilowga dhegaysiga. Haddii aad bixinayso wax ka badan hal warqaddeed, waa inaad ku dartaa liiska warqaddaha iyo tirada isku xigta bog kasta sidii oo ay ahaayeen hal warqad ah.

**Haddii aad doonayso inaad isticmaasho warqaddaha aan ku qornayn Ingiriisi iyo Faransiis**, waa inaad bixisaa turjumaada la ansixiyay ee Ingiriisiga iyo Faransiiska warqaddahan.

**Haddii aad markhaati hayso**, RPD waa inay heshaa macluumaadka lama huraanka ah ee ku saabsan markhaatiga (uu ku jiro macluumaadka xidhiidhka iyo waxay caddaynta noqon doonto) wakhti aan ka dambayn 10 maalmood ka hor taariikhda dhegaysigaaga.

…/4

## WARQADDAH AQOOONSIGA

Waa inaad bixisaa warqaddaha caddaynaya aqoonsigaaga. Asalka warqaddahan waa in lagu soo bandhigaa dhegaysiga. Haddii aad bixin kari waydo warqaddahan, waa inaad sharaxdaa sababta aanad u bixin karin iyada iyo tallaabooyinka aad qaaday si aad u hesho.

## LUQADDA IYO TURJUBAANKA

Dhegaysigaagu waxa uu ku qornaan doonaa luqadda rasmiga ah (Ingiriisi ama Faransiis) kaas oo aad dooratay.

Haddii la codsado, waxaa lagu siin doonaa turjubaanka luqadda/lahjada aad doorashadaada ah.

Haddii aad doonayso inaad beddesho luqadda rasmiga ah ee dhegaysiga waa inaad ku wargelisaa RPD, IRCC iyo/ama CBSA wakhti aan ka dambayn 10 maalmood ka hor taariikhda dhegaysigaaga.

Haddii aad doonayso inaad beddesho luqadda/lahjada turjumaada, waa inaad ku wargelisaa RPD qoraal ahaan wakhti aan ka dambayn 10 maalmood taariikhda dhegaysiga.

## XIDHOOMYINKA WARQADDAHA QARANKA

IRB waxay soo saartaa Xidhmooyinka Warqaddaha Qaranka (NDP) wadan kasta halkaas oo ka jirtay dacwada ilaalinta qaxootiga. Waa inaad dib u eegtaa warqaddaha NDP ee wadankaaga, maadaama RPD ay iyaga ka fekeri doonto marka la go’aaminayo dacwadaada. NDP waxay ka kooban tahay warqaddah ka warbixiya xaaladaha wadanka, sida warbixinaha xuquuqal aadamaha ka yimid ururada caalamiga ah. Waa inaad sidoo kale eegtaa websaydka IRB noocyada cusub ee NDP ka hor dhegaysiga. Nuqulka NDP iyo macluumaadka kale waxaa laga arki karaa websaydka IRB (http://www.cisr-irb.gc.ca).

**Macluumaadka dheeraadka ah**, fadlan eega *Hagaha Dacwoodaha* ama la xidhiidh xafiiska diwaanka mid ka mid ah cinwaanada soo socda:

## XAFIISYADA DIIWAANKA RPD

Bariga Kanada

Montréal
Guy-Favreau Complex
200 René-Lévesque Blvd. West
East Tower, Room 102
Montreal, Quebec H2Z 1X4
Telephone: 514-283-7733 or
1-866-626-8719
Fax: 514-283-0164

Bartamaha Kanada

Toronto
74 Victoria Street, Suite 400
Toronto, Ontario M5C 3C7
Telephone: 416-954-1000
Fax: 416-954-1165

Galbeedka Kanada

Vancouver
300 West Georgia Street,
Suite 1600
Vancouver, BC V6B 6C9
Telephone: 604-666-5946 or
1-866-787-7472
Fax: 604-666-3043